



Farriintani waxaa iyada oo ah English, Русский, Soomaali, Español, 简体中文, TiếngViệt la soo geliyay <https://go.usa.gov/xtBQC>.

Juun 16, 2022

Ku socota: Hay'adaha Maamulka Kiiska

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Macluumaad ku saabsan xaalada caafimaad ee degdega ah

Xaalada caafimaad ee degdega ah ee bulshada ee federaalka (PHE) ee loogu talagalay cudurka baahsan ee COVID-19 ayaa la qorsheeyay in uu wakhtigiisu dhaco Luulyo 16, 2022.

Xarumaha Adeegyada Medicare iyo Medicaid (CMS) waxaa ka go'an bixinta ogeysiin dadweyne oo 60-maalmood ah marka aysan kordhinayn PHE. Ma aysan bixin ogeysiintani loogu talagalay waqtiga uu dhacayo ee Luulyo. Sidaasi darteed, waxaan CMS ka filaynaa in ay kordhiso PHE wixii ka dambeeya Luulyo 16.

Iyada oo ay jiraan in CMS ay ka go'an tahay in ay bixiso ogeysiin 60-maalmood ah, waxaa jiri doona wakhti lagu hirgeliyo isbeddelada la xiriira dhammaadka PHE ka dib ku dhawaaqida la sameeyo. Waanu bogaadinaynaa tallaabooyinka aad hadda qaadi kartaan adiga iyo kooxdaadu si aad u wax u qorshaysataan oo isku diyaarisaan inkasta oo ODDS aysan u baahnayn tallaabo gaar ah waqtigan la joogo.

Ma garanayno inta ay noqon karto muddo kordhinta soo socota, mana garanayno goorta wax ku dhawaaqida la sameyn doono. Waanu kula soo socod siin doonaa marka aan helno macluumaad dheeraad ah.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa <http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriiir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.